


Cod ma aan bixin karaa?

Qafka waxaa ka luma xaqa inuu cod bixin karo hadii dembi ah felony lagu cadeeyo marka la eego sharciga gobolka Washington. Qofka ma codeyn karo intuu xirin yahay, ama ha u xirnaado gobolka ama dowlada federaalka. Xaqa cod bixinta waa kuu soo noqon markii lagu soo sii daayo oo aad dhamaysato xabsiga. Warqadaan hoosteeda waxay ku sharaxi sida loo soo ceshado xaqa cod bixinta hadii dembi lagugu xukumo.

Ma waxaa lagugu cadeeyey dambi felony ama misdemeanor ah?



Hadaad hubin in waaxda asluubta weli ku kormeerto iyo in kale, la xiriir telefoonka waaxda Asluubta (DOC) 1-800-430-9674, Isniinta ilaa Jimcaha int u dhixeeysa 8 a.m.-5 p.m. Wareyso kormeeraha in waaxda asluubta dacwadaadii weli ka furan tahay iyo in la xiray. Hadey ku dhahaan dacwadaadii waa la xiray waad is diiwaan gelin kartaa si aad u dhiibato codka. Hadey dhahaan dacwada weli waa furan tahay ma aad dhiiban kartid codka. Intaad talaabo qaadin la xiriir waaxda asluubta si aad arrinta u hubiso.

Codka ma aad dhiiban kartid. Laakiin markii ay dhamato kormeerka waaxda asluubta kugu heysa iyo mudada xabsiga lagugu xukumay waad soo ceshan kartaa xaqa cod dhiibashada. Xaqa cod dhiibashada toos ayuu kuugu soo laaban markii xabsiga iyo kormeerka kuu dhamaadaan. Inaad codka dhiibato adigoon xaq u leheeeyn waa dambi, sidaas daraadeed waa muhiim inaad hubiso arrintaan. La xiriir waaxda asluubta oo weeydiin mudadii xabsiga iyo kormeerka kuu dhamaadeen iyo in kale.

Waa aad is diiwaan gelin kartaa si aad cod u dhiibato.

Waxaa jira dhowr si oo aad isu diiwaan gelin karto si aad cod u dhiibato. Inaad tagto xafiiska xisaabiyaha countiga, xafiiska dowlada, dugsiyada, maktabada, meesha dab damiska, iwm., ayaad iska diiwaan gelin kartaa si aad codkaaga u dhiibato. Internetka websika www.sos.wa.gov waad iska diiwaan gelin kartaa, ama tag xafiiska ururka haweenka.